



Ardayda Benson waxa ay abuureen farshaxan kaasi oo qurxin doona Degmada Lloyd

Dugsiga Sare ee Benson Polytechnic waa jaar qadiimi u ah Degmada Lloyd ee Portland. Sida jaarka wanaagsan, qaar kamid ah ardayda Benson waxa ay wadaan horumarin ah koboca nolosha goobta.

Ardayda macalinka Steve Curley ee fasalka qaabaynta meedhiyuhu waxa ay abuureen farshaxan kaasi oo loo isticmaali doono in lagu qurxiyo gasaacadaha qashinka ee dhammaan xaafadda Lloyd. Kadib bilooyin laga shaqaynayay mashruuca, waxsoosaarkii kasoo baxay waxa baadhay toddobaadkii hore Paul Comery [Go Lloyd](#), mid aan macaash doon ahayn kaasi oo raadiya inuu xanaaneeyo horumarka dhaqaalaha ee Degmada Lloyd.

“Farshaxanku waxa uu aad u dhaafsan tahay filashadayda, ardaydani waa farshaxamiistayaal cajiib ah, “ Comery ayaa yidhi. “ Ardaydu waxa ay qabteen shaqo cajiib ah oo xidhiidh la leh qaabka iyo jawaabta aan siinay, shaqooyinka ugu danbeeyaana waxa ay noqon doonaan qaar cajiib ah boqortooyada dadweynaha ee Lloyd.”

Arydaydu waxa ay ku qoreen fikradahooda waraaq, dabadeedna waxa ay ku sameeyeen kombuyuutar, iyaga oo isticmaalaya mid ahaan Adobe Photoshop ama Adobe Illustrator. Guud ahaan habka samaynta, waxa ay heleen jawaab iyo hagiis ka timiday shaqaalaha [Instrument](#), wakaalada dijitaaliga samaysa oo kutaal Portland, sidoo kale Go Lloyd.

“Waxa ay awoodeen inay u shaqeeyaan laba kooxood oo khibrad leh, labadooduba waxa ay ula dhaqmayaan ardaydayada xushmada iyo sharafta xidhiidhka khibrada,” Curley ayaa yidhi. “ Waxa ay yeesheen kulamo badan oo jawaabo ah halkaasi oo shaqadooda lagaga xaajooday, jawaabo ayaa la siiyay isbaddeladana waxa lagu sameeyay iyada oo lagu salaynayo codsiga loo adeegaha.”

Qiyaastii 30 qaybood o farshaxan ayaa loo diri doonaa in lasoo saaro Maaris, gasaacadahana waxa lagu rakibi doonaa xaafadda Julaay.

“La shaqaynta ardayda Benson siloo meeleeyo mashruucyada Lloyd waxa ay ahayd hafadka Go Lloyd sanado badan,” Comery ayaa yidhi. “ Aad baan ugu faraxsanahay inaan awoodno inaan ka qayb qaadano mashruuc kaasi oo keenaya farshaxanka ardayda qaybta dadweynaha kordhinaya nadaafada hareeraha wadada. Rajadayada mashruucani waxa uu noqon karaa ammaan dhammaan ardayda Benson waxa uuna kordhin doonaa dareenkooda lahaanshiyaha iyo kujiritaanka xaafadda Lloyd.”

Curley, mashruuca uu siiyay ardaydiisa waa qaab cajiib ah kaasi oo ay qaadan karaan.

“Xaqqi qda ah in shaqada laga dhigi doono mid muddo dheer ah si dadweynaha loo raaligaliyo waxa ay adkaynaysaa keega,” Curley ayaa yidhi. “Way farxeen.”